**Sharciga 7 Marso 1957, lamba. 298**

**Ansixinta iyo fulinta Heshiiska Qunsuliyeed ee dhexmaray Talyaaniga Ingriiska oo ay wehliyaan lifaqyada Brotokollada saxiixyada iyo isweydaarsiga Qoraallada oo lagu gaaray Roma 1 Jannaayo 1954.**

Golaha Xeer Dejinta iyo Golaha Senetoorada Jamhuuriyada Talyaaniga waxay oggolaadeen

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA TALYAANIGA**

**WUXUU MEELMARIYAY**

Sharciga soo socda.

**Qod. 1**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxaa loo oggolaaday in uu ansixiyo Heshiiska qunsuliyeed oo ay wehliyaan lifaaqyada Brotokoolka saxixyada iyo isdhaafsiga Qoraalka lagu gaaray Rooma oo dhexaray Jamhuuriyada Talyaaniga iyo Midowga Boqortooyada Britan iyoWaqooyiga Irland, 1 Juun 1954.

**Qod. 2**

Heshiisku waxaa loo siiyay fulin buuxda oo dhammaystiran arrimaha kor lagu soo sheegay laga bilaabo taariikhda uu dhaqangalo. Xeerkaan, oo wata niggaxa Dawladda, waxaana lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee xeerarka iyo dekereetooyinka Jamhuuriyadda Talyaaniga. Cid kasta waxaa ku waajiba in ay u hoggaansanto unailaaliso ka xeer Dawladeed ahaan. Taariikhda, Roma, 7 Maarso 1957.

**Gronchi**

**SEGNI — MARTINO — MORO**

**— CASSIANI — TAMBRONI — ANDREOTTI**

**Waxaa hubiyay, Niggax haya – MORO**

**HESHIISKA QUNSULIYEED**

**OO DHEXMARAY TALYAANIGA INGRIISKA**

---

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga iyo iyo Boqoradda Midawga Britan iyo Waqooyiga Irland iyo Boqortooyada iyo Dalalka kale, Madaxda Commonwelth; Iyagoo doonaya in ay nidaamiyaan jagooyinka saraakiisha qunsuliyadaha mid kasta Dhinacyada dhulalka kiisa kale; waxay ku heshiiyeen in ay gaaraan Heshiis qunsuluyeed, si ulajeeddadaas loo gaaro waxay magacabeen Wakiiladooda awooda sita:

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA TALYAANIGA**

**DHINACA TALYAANIGA:**

MUDANE XILDHIBAAN AVV. ATTILLO PICCIONI, Wasiirka Arrimaha Dibadda;

SHARAF LAHA BOQRADDA MIDOWGA BRITAANYA IYO WAQOOYIGA IRLAND IYO BOQORTOOYADEEDA IYO DALALKA KALE, MADAXDA COMMONWEALTH (ee hoos ymaada “Boqradda”);

**DHINACA MIDOWGA BRITAANYA IYO WAQOOYIGA IRLAND**

Mudane Sir. HENRRY ASHLER CLARKE, K. C. M. G, Safiirka gaarka iyo wakiilka awoodda buuxda Boqortayda u fadhiya Roma.

Kadib markii ay isweydaarsadeen awoodahooda buuxda ee la siiyay, iyagoo garowsan niya samida iyo ujeeddada saxda ah, waxay ku heshiiyeen:

**Qaybta 1aad**

Meesha lagu Dabbaqayo iyo Qeexidda

**Qod. 1**

Heshiiskan waxaa lagu dabbaqaya:

1. — Wixii khuseeya Jamhuuriyadda Talyaaniga, dalka Jamhuuriyadda iyo dhammaan dalalaka masuliyadda xiriirkooda caalamiga uu talyaanigu hayo.
2. — Wixii khuseeya Boqrtooyada Midowga iyo Waqooyiga Irland Britaanya, iyo dalalka ay Boqrtooyada Britaaanya masuuliyadda xiriirkooda caalamiga ay hayso.

**Qod. 2**

Dhaqangalka Heshiiskaan:

1. Ereyga “Dawladda wax direysa” wuxuu tilmaamayaa, kolba xaaladdaha Dhinaca Sare ee Heshhiska wax ka galaya uu soo magacabayo sarkaalka qunsuliyadda, ama dhammaan dalalka Dhinaca Sare ee la soo sheegay oo heshiskaan lagu dabbaqayo.
2. Ereyga “Dawladda degganaashaha” wuxuu tilmaamaya kolba xaaladaha, Dhinaca Sare ee heshiiska galay dalka dhexdiisa oo sarkaalka qunsuliyadda uu ka qabanayo xilka xaafiiskiisa khuseeya, amase dhammaan dalalka Dhinaca la soo sheegay oo Heshiiskaan lagu dabbaqayo.
3. Ereyga “dalka” wuxuu tilmaamayaa qayb kasta oo ka mida dhulalka la degganyahay, tasoo ay ku yaalliin dhammaan ama qayb ahaan aagga sarkaalka qunsuliyadda, kaaso la

wargaliyay inuu yahay unug ka mida dalka qunsuliyadda marka la dabbaqayo dhammaan ama qaar ka mida qodobada Heshiiska.

4. Ereyga "muwaadin" wuxuu tilmaamayaa:
   a) waxa khuseeya Jaamhuuriyadda Talyaaniga, dhammaan muwaadiniinta talyaaniga iyo dhammaan dadka ka mida dalalka talyaanigu oo masuuliyadda xiriirkooda caalamiga ay hayso, ay ku jirto marka nuxurka ay u saamaxayso dhammaan shaqsiyaadka qaanuniga oo loo abuuray si xeerarka waafaqsan mid kasta oo ka mida dalalka Heshiiska lagu dabbaqayo;
   b) wixii khuseeya Boqortooyada, dhammaan muwaadninta Midawga Britaanya iyo Mustacamaradaha, dhammaan muwaadiiinta Rhodesia koofureed iyo dhammaan muwaadiniinta maxmiyadaha Britaanya, ay ku jirto marka nuxurka ay u saamaxayso dhammaan shaqsiyaadka qaanuuniga oo loo abuuray si xeerarka waafaqsan mid kasta oo ka mida dalalka Heshiiska lagu dabbaqayo.
5. Ereyga "markab" wuxuu tilmaamayaa marka loo eego Qaybta VII ee Heshiiska"
   a) wixii khuseeya maraakiibta Jamhuuriyadda Talyaaniga, waa markab kasta ama doon (aan ahayn markab dagaal) oo sita calanka talyaaniga;
   b) wixii khuseeya maraakiibta Boqortooyada, waa markab kasta ama doon oo ka diiwaan gashan deked ku taalla dalalka Boqortooyada oo Heshiiskan lagu dabbaqayo.
6. Ereyga "sarkaal qunsuliyadda" wuxuu tilmaamayaa qof kasta oo la siiyay "aqonsi rasmi ah" ama oggolaasha kale (oo uu ku jiro oggolaasho ku-meelgaara) kuna hawlgalo mansabkaas masuulinta dalka shaqada ku leh, saraakiisha; qunsuliyadaha waxay noqon karaan kuwa xilka haya ama kuwa sharafeed.
7. Ereyga "karaani qunsuliyadda" wuxuu tilmaamayaa qof kasta, inkastoo aanu sarkaal qunsuliyadeed ahayn haddana shaqa ka haya xaafiiska qunsuliyadda, waxaase shardi ah in magaciisa marka hore loo soo gudbiyo — si waafaqsan qodoka 6 ee Heshiiska – masuulinta shaqada ku leh ee dalka; shuruudaha la soo sheegay sikastaba kuma jiraan darawallada ama dadka si gaara u xilsaaran daayactirka goobaha ama adeegyada kale ee guriga.
8. Ereyga "xaafiiska qunsuliyadda" wuxuu tilmaamaya dhisma kasta ama qayb ka mid dhismaha uu si gaara sarkaalka qunsuliyadda ku qabta shaqada rasmiga.

**Qaybta 2aad**

Hawlwadeenada iyo Deegaanka Qunsuliyadda

**Qod. 3**

1. Dawladda soo dirsatay waxay abuuri kartaa oo haysan kartaa xaafiisyo qunsuliyadeed dalalka dawladaha ay degantahay goob kasta oo uu ka jiro xaafiis qunsuliyadeed ee dawlad saddexaad, iyo goob kasta ee dawladda degganka ay oggolaato in laga sameeyo xaafiis qunsuliyeed. Dawladda soo dirsatay ayaa xaq u leh in ay go'aamiso haddii xaafiis qunsuliyadeed uu noqonayo qunsuliyad guud, qunsuliyad, qunsuliyed ku-xigeen ama wakiil qunsuliyadeed.

2. Dawladda wax soo dirsatay waxay la socodsiinaysaa dawladda deegaanka goobta uu ku yaallo midkasta oo xaafiisyadeeda qunsuliyadda ka mida, iyadoo laga maagayo axkaamta ku qoran baaragrafka 3 ee qodobkaan, wuxuu si xora u jidayn karaa xudduudo.
3. Dawladda deegaanka waxay xaq u leedahay in ay diiddo ku soo darista goob qunsuliyeed;
    a) meel kasta oo aan ka mid ahayn aagga qunsuliyadda, oo aanay ka furnayn wakiilada rasmiga ee ganacsiga dawlad saddexaad;
    b) dhulka dawlad saddexaad.
4. Sarkaalka qunsuliyadda, marka uu wargaliyo Dawladda deegaanka, wuxuu ka qaban karaa hawlo qunsuliyed meel ka baxsan deegaankiisa, haddii Dawladda deegaanku aanay u diidin.

**Qod. 4**

1. Dawladda soo dirstay waxay u xilsaari kartaa mid kasta oo kamida xaafiisyadeed qunsuliyadaha daraja kasta iyo tirada loo baahanyahay. Dawladda soo dirstay waxay qoraal ku wargalinaysaa Dawladda deegaanka magacaabidda sarkaal kasta ee qunsuliyadeed ee xaafiiska qunsuliyadda. Marka saraakiisha qunsuliyeed sharafeedka ay yihiin muwaadiniinta Dawladda deegaanka, midkaan dambe waxaa la weydiisan karaa oggolaashaha magacaabidiisa saraakiishaas in marka hore lagu helo jidka dibolomaasiyadda;
2. Aqoonsiga rasmiga iyo oggolaashaha kale ayaa sida ugu dhaqsiyaha badan oo lacag la’aana ayaa Dawladda deekaanku bixinaysa ruqsadaha hawlaha qunsuliyadda ama waxyaabaha kale oo ku salaysan wargalinta magacaabidda. Haddii loo baahdo, waxaa lagu heshiin kara oggolaasho ku-meelgara, inta laga sugayo aqoonsiga rasmiga ama oggolaashaha kale;
3. Aqoonsiga rasmiga ama oggolaashaha kale lama diidi kara sababa macquula haddii anay jirin;
4. Looma qaadan karo in Dawladda deekaanku ay oggolaatay sarkaalka qunsuliyadduna uu hawshiisa iska wato ama lagula heshiiyo waxtarrada Heshiiska ku qoran, illaa Dawladda la soo sheegay ay bixiso aqoonsiga rasmiga ama oggolaashaha kale.

**Qod. 5**

1. Dawladda deegaanka waxay u sheegaysaa daahid lahaan masuulinta shaqada ku leh magaca sarkaalka qunsuliyadda loo oggolaaday qabashada xilkiisa si waafaqsan Heshiiskaan.
2. Isagoo ah wakiilka rasmiga ee Dawladda soo dirsatay, sarkaalka qunsuliyadda wuxuu xaq u leeyahay ilaalin gaara iyo tixgalin sare ee dhammaan saraakiisha Dawladda deegaanka oo la leh xiriirada rasmiga.
3. Dawladda deegaanka waxay kala noqon kartaa aqoonsiga rasmiga iyo oggolaashaha sarkaalka qunsuliyadda oo hab-dhaqankiisa ka yimaada cabashooyin culus. Sababaha taas loogala noqonayo waxaa la wargalinayaa jidka dibolomaasiyadda, haddii aa weydiisto Dawladda soo dirstay.

**Qod. 6**

Dawladda soo dirsatay waxay iqtiyaar u leedahay in ay qorato tirada karaaniyaasha ay xaafiisyadeeda uga baahantahay, ha ahaadeen muwaadinin Dalka la soo sheegay ama muwaddaniyiin deegaanka ama Dawlad saddexaad. Saraakiisha qunsuliyadda waa in la socodsiiyaa Dawladda deegaanka magacyada iyo cinwaanada karaaniyaasha. Dawladda dalka waxay tilmaamaysaa masuuliinta shaqada ku leh oo macluumaadkaas lala socodsiinayo.

**Qod. 7**

Sarkaalka qunsuliyadda ama karaaniga waxaa loo xilsaari karaa in uu qabto xilalka uu qaban jiray sarkaal geeriyooday ama xilkiisa gudan waayay sababa la xariiro jirro ama maqnaansho ama sababo kale. Marka la wargaliyo Dawladda deegaanka sarkaalka xilka sii haya wuxuu xilkiisa gudanayaa isago leh mudnaaanada ku xusan Heshiiskaan, inta uu ka soo laabanayo sarkaalkaas isaga ama laga soo magacaabayo sarkaal cusub.

Haddii midka xilka sii haya uu yahay karaani qunsuliyadda, isagu ma heli karo, sababaha xil-haynta ku-meelgaarka, arrimaha canshuuraha iyo canshuuraha kastanka, mudnaano ka sii ballaaraan kuwa uu sharciyan xaq u lahaa marka loo eego Heshiiskaan.

**Qod. 8**

Dawladda soo dirsatay, haddii ay oggolaato Dawlada deegaanka waxay u soo magacaabi kartaa xaafiiska qunsuliyadda ku taalla xarunta Xukuumadda dhexe ee Dawladda deegaanka mid ama xubno ka badan wakiillo dibolomaasiyadeed oo u fadhiya Dawladdaan dambe.

Magacaabiddaas waa in waafaqsantahay axkaamta qod. 4 Heshiiskaan. Saraakiisha laga hadlayo waxay sii haysanayan dhammaan mudnaanada iyo xasaanadda iyaga u sugnaatay ee ay ku mutaysteen dibolaamasiyadnimida, inta ay hayaan xilka qunsulidda waxaa lagu dhaqayaa axkaamta Heshiiskaan.

**Qaybta 3aad**

Mudnaanada iyo Xasaanadda

**Qod. 9**

1. Dawladda soo dirsatay waxay awoodaa, iyadoo u hoggaansan shuruudaha ay xeerarku dalka sheegayaan, in ay hanato, haysato iyo degto iyadoo la qaddarinayo cinwaan kasta ee xeerarka dalka, magaceeda ama magac qof kale ama mid qaanuneed oo ku falgalaya magaceeda, dhul, dhismo, qaybo guryo ama ka mida, waraaqo sharciyeed dalka dhexdiisa kuwaaso lagama maarmaan u ah degidda xarunta xaafiiska qunsuliyadda, ama degmada sarkaalka qunsuliyadda xilka haya, waxaase shardi ah xaaladdaan dambe, degmada la sooo sheegay in ay ku dhextaallo isla dhismaha ay ku taallo xarunta xaafiiska qunsuliyadda. Marka la eego xeerarka Dawladda deegaanka, haddii oggolaashaha uu shardi yahay iibsiga noocaasa waa in laga wada heshiiyaa, waana in la sameeyaa qaabka loo baahanyahay haddii aanay jirin sababa gaaara oo diidaya.
2. Dawladda soo dirsatay waxay xaq u leedahyay in ay dhisto arrimaha la xariira ulajeeddooyinkan ku xusan baaragrafka 1 ee Xeerkaan, maguurtooyin ama wax raacsan dhulka la iibsaday.
3. iyadoo maanka lagu hayo in Dawladda soo dirsatay ay waajib ku tahay in ay u hooggaansato xeerarka iyo xudduudaha khuseeya baaragrafka 1 ee xeerekaan ee arimaha dhismaha iyo iyo qorshaha nidaamyada oo laga fulinayo goobta dhulka, dhismayaasha,

qaybaha ka mida dhismayaasha iyo kuwa ku xiran ee ku xusan baaraagrafka 1 iyo 2 e Xeerkaan

**Qod. 10**

1.
   a) — dayrka iyo darbiyada bannaanka ee dhismaha xaafiiska qunsuliyadda waxaa lagu dhaji karaa calaamado iyo astaanta dawladda soo dirsatay iyadoo la adegsanayo qoraal ku habboon oo tilmaamaya xaafiiska qunsuliyadda oo ku qoran luqadda rasmiga ee Dawladdaas. Calaamadda iyo astaanka qaranka iyo qoraalka waxaa lagu dhajin karaa iridda xaafiiska qunsuliyadda ama meel u dhow.
   b) — Calanka Dawladda soo dirsatay iyo calanka qunsuliyadda waxaa laga taagi karaa xarunta xaafiiska qunsuliyadda iyo qaab habboon guriga sarkaalka qunsuliyadda, sidoo kale, sarkaalka qunsuliyadda, marka uu xikiisa gudanayo, wuxuu muujin karaa calaamadda ama astaanta Dawladda soo dirsatay iyo in uu ka taago calanka dawladdiisa iyo calanka qunsuliyadda baabuurta, maraakibta iyo dayaaradaha isaga loo qoondeeyay.
   c) — Masuulinta dawladda deegaanka waa in ay qaadaan tallaaooyinka ku habboon oo lagu hubinayo calanka Dawladda soo dirsatay, calaamaddeeda iyo calankeeda qunsuliyaddaa, ee loo adeegsado si waafaqsan axkaamta baaragrafayada 1 iyo 2 ee baaragrafkaan, xurmada iyo ilaalinta la iska doonayo.
2. Boliiska iyo masuuliinta kale dalka ma geli karran xaafiiska qunsuliyadda haddii aanu oggolaan sarkaalka qunsuliyadda haya, ama haddii ogglaashahaas aan la heli karin, in la fulinayo amar rasmiya oo ka soo baxay Wasiirka Arrimaha Dibadda xaaladaha dhulalkaa ku xusan baaragrafka 2 ee isla qodobkaas. Sikastaba oggolaashaha sarkaalka qunsuliyadda waxaa loo qaadanayaa in uu oggolaaday haddii dab ka kaco ama dhibaato kale ama haddii xarunta qunsuliyadda uu dambi ka dhacay ama ka dhacayo dambi ku lugle gacan ka hadal, iyadoo la fahamsanyahay in druufahaaso kale sida ugu dhaqsiyaha badan lala socodsiinayo Dawladda soo dirsatay jidka diboloomaasiyadda qoraal faah-faahsan sababta keentay soo dhexgalka.
   Axkaamta baaraagrafkan lagu dabaqayo haddii sarkaalka qunsuliyadda haya uu yahay muwaadin Dadawladda Deegaanka ama haddii aanu ahayn muwaadin Dawladda soo dirsatay.
3. Xarunta xaafiiska qunsuliyadda looma adeegsan karo meel lagu siiyo magangalyo qof ay doon-doonayaan hay'adaha garsoorka. Haddii sarkaalka qunsuliyadda uu diido in uu soo gacangeliyo qof hay'adaha garsoorka ay raadinayaan, oo si sharci ah masuulinta dalka ay soo weydiistaan, masuulinta la soo sheegay waxay awoodaan haddi ay la tahay lagama maarmaan si waafaqsan axkaamta baaragrafka 2 ee qodobkaan gelidda xarunta xaafiiska qunsuliyadda, in ay galaan si loo soo qabto qofka la raadinayo.
4. Gelitaanka xaafiiska qunsuliyadda ama baarista isaga si waafaqsan baaragrafka 2 iyo 3 ee qodobkaan waa in lagu fuliyaa iyadoo la tixgalinayo oo aan lagu xadgudbin arkifiyada qunsuliyadda, sida ku cad baaragarafka1 ee qodobka 12.
5. Sarkaalka qunsuliyadda ma sheegan karo mudnaanata uu leeyahay xaafiiska qunsuliyadda ee Heshiiskaan marka la eego ulajeeddooyin aan ku xiranayn hawlqabadayada shaqooyinka qunsuliyadda.

**Qod. 11**

1. Dhulalka, dhismayaasha iyo qaybaha dhismayaasha iyo waxa la xariira, ay ku jiraan guurtooyinka, alaabta guriga, loo isticmaalo ama si gaaro loo haysto ujeeeddooyinka lagu sheegay baaragrafka 1 e qodobka 9, sida baabuurta, maraakiibtata iyo dayaaradaha qunsuliyadda lalama wareegi karo ama looma isticmaali karo hoy askareed. Dhulkaas la soo sheegay ee dhismayaasha, qaybaha dhismaha iyo waxa la xariira kama caagana in la qarameeyo ama loo qabto sababa la xariira diffaaca qaranka ama dan guud si waafaqsan xeerarka dalka; sikastaba, haddii loo baahdo in la qaado tallaaba caynkaasa oo ku saabsan hantida la soo sheegay, waa in la yimaada taxaddar kasta oo looga hortagayo faragelinta hawlaha qunsuliyadda.
2. Waxaa intaas dheer, sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda, marka labada xaalba in la qanciyo xaaladaha lagu cayimay baaragrafka 6 ee qodobkaan, guriga uu degganyahay, guurtadiisa iyo alabta kale ee guriga sidoo kale baabuurta, maraakiibta iyo dayuuradaha oo ah isaga milkigiisa ama isagu haysto, waxay ka caaganyihiin in lala wareego, la tabaruco ama la dejiyo ciidan. Mudnaantaas laguma fidinayo hantida kale ee uu leeyahy. Guriga uu degganyahay sarkalka ama karaaniga qunsuliyadda kama caagana in la qarameeyo ama loo qabto sababa la xariira diffaaca qaranka ama danta guud si waafaqsan xeerarka dalka.
3. Xaaladda qaramaynta ama qaadashada ku dhacda qunsuliyadda ama deegaanka sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda, si waafaqsan baaragrafyada 1 iyo 2 ee qodobkaan, Dawladda deegaanka sida uu qabo xeerarka dalka waxay qaadaysaa taallaaba kasta oo ku habboon oo lagu hubinayo meelaha kale ee hoyaadka u qalma.
4. Waliba, waa in laga bixiyaa magdhow u qalma qaramaynta ama qabsashada, taaso laga bixin karo canshuurta rasmiga ee sarifka sida danta wayn ugu jirto dawladda soo dirsatay waqtiga milkiyadda la soo sheegay la qarameeyay ama la qaatay, qaab si xora loogu baddali karo lacagta dawladda soo dirsatay iyo lagu wareejiyo iyada, dhammaan xuquuqda lagu leeyahay milkiyadda xarunta maguurtada xaafiska qunsuliyadda ( oo ay la socoto dhammaan dhulalka, dhismayaasha, qaybaha dhismayaasha iyo waxa ku xiran milkiga ama haysashada oo si gaara ku wajahan ulajeeddooyinka lagu sheegay baaragrafka 1 ee qodobka 9 taasoo ay leedahay Dawladda soo dirsatay, ama sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda ama qof kale ama shaqsiyad qaanuuneed oo ku jooga magaca iyo danaha dawladda soo dirsatay. Magdhawga la soo sheegay waa in lagu bixiyaa muddoo aan ka badnayn lix bilood gudahood oo ka bilaabata taariikha xaafiiska qunsuliyadda ama sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda laga qaaday gacan ku haynta hantidida laga hadlayo.
5. Sarkaalka qunsuliyadda, oo aan ahayn muwaadin Dawladda deegaanka, iyo xitaa karaaniga qunsuliyadda, oo qanciya xaaladaha ku xusan baaragrafka 8 ee qodobkaan, waxaa laga dhaafayaa adeegyada ciidanka, badda, circa, boliiska, maamulka iyo xeer beegtida garsoorka ee nooc kasta.
6. Xaaladaha ku xusan baaragarfyada 2 iyo 5 ee qodobkaan waa kuwa soo socda:
   a) daneeyuhu in uu yahay muwaadin dalka soo dirsaday oo aan lahayn dhalashada dalka Dawladda deegaanka iyo;
   b) daneeyuhu in aanu dalka ku lahayn hawlo gaara oo faaiida leh; iyo
   c) daneeyuhu in aanu dalka degganayn marka loo soo magacaabay xaafiiska qunsuliyadda.

**Qod. 12**

1. Arkiifyada iyo dokumentiyada kale ee waraaqaha rasmiga ah markasta waa kuwa aan lagu xadgudbi karin iyadoo masuuliinta deegaanka aanay waxba sina ku sheegan karin ama ay qaadan karin mid ka ida.
2. Arkiifiyada la soo sheegay, dokumentiyada iyo waraaqaha rasmiga waa in lagu hayo meel gaar ka ah waraqaha uruursan, buugaagta iyo waraaqaha ay isku diraan saraakiisha ama karaaniyaasha qunsuliyadda ee ku saabsan arrimaha kala duwan. Axkaamtaan ma aha waajib in laga sooco arkiifiyada iyo dokumentiyada dibolomaasiyadda kuwa qunsuliyadda marka xaafiiska qunsuliyaddu uu xaruntiisu tahay goobaha ergada dibolomaasiyadda.
3. Sarkaalka qunsuliyadda wuxuu xaq u leeyahay in uu la xariiro dawladdiisa, ergada dibolomaasiyadda uu isagu ka tirsanyihiin ama qunsuliyadaha kale ee Dawladaha soo dirsatay oo ku yaalla isla dalka isagoo adeegsanay boostada, telegram, telefoon iyo isgaatsinta kale ee dadweynaha; wuxuu kaloo xaq u leeyahay in uu diro iyo loo soo diro waraaqo rasmiya jidka sanduuqa iyo xirmooyinka qunsuliyed oo niggaxan oo ay ku jiraan keliya waraaqahaas rasmiga; labada arrimoodba waxaa la isticmaali karaa lambarro ama xarfo (code). Sikastaba, haddi mid ka mida Dhinacyada Sare ee Heshiskaan galay u dagaal kaa dhexeeyo, xaqaas ah in la wargaliyo iyo wax la iku diro jidka ergada dibolomaasiyadeed, oo xaafiiska qunsuliyaddu uu ka tirsanyahay, wuxuu awoodaa, ergada dibolomaasiyadeed ee la soo sheegay ay ku sugantahay meel ka baxsan dalka deegaanka, in la xannibo. Sarkaalka qunsuliyadeed, wuxuu kaloo awoodaa in uu la xariiro iyo waraaqo u diro isla qaabkaas ergo kale ee dibolomaasiyeed iyo qunsuluyadeed ee Dawladda soo dirsatay, ama masuulinta dhulal kale ee Dawladda la soo sheegay, haddiiba ay jirto Dhinacyada Sare ee heshiiskaan galay ay dagaal kula jirto, xuquuqdaan kale waxaa la saari karaa xannibaadyo.
4. Waraaqaha rasmiga ee ku xusan baaragrafka 3 ee qodobkaan waa kuwa aan lagu xadgudbi karin, masuuliintaa deegankuna ma eegi karaan mana haki karaan. Kuwa sanduua iyo xirmooyinka ee ku xusan baaragrafka kore waa in loo gaaryeelaa isla macaamilada lagula heshiiyay dawladda deegaanka sanduuqa dibolomaasiyadda dawladda soo dirstay.
5. Sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda wuxuu xaq u leeyahay in uu diido codsiga masuulinta garsoorka ama masuuliinta kale oo ah in uu tusiyo dokumenti kasta ee ku jirta arkiifiyada ama dokumentiyo kale oo rasmi ah sidoo kale in uu bixiyo wax kasta oo ku lugle shaqada xaafiiskiisa. Sikastaba, codsiga noocaasa waa in la aqbalaa, haddii ay la noqota sarkaalka qunsuliyadda in ay ku jirto danta caddaalada isala markaana aanay wax u dhibayn danta dawladda soo dirsatay.

**Qod. 13**

1. Sarkaalka iyo karaaniga qunsuliyadda laguma qaadi karo walaayadda garsoorka dawladda deegaanka arrimaha ku saabsan hawlqabadyada rasmiga, ee la xariira hawlaha qunsuliyadda oo ku salaysan xeerka caalamiga ee loo aqoonsanyahay sida dalka oo kale, haddii dawladda soo dirsatay aanay codsan ama oggolaan socodsiinta dacwadda iyadoo la soo marsiinayo wakiilkooda dibolomaasiga.
2. Ka sokow wixii la isla garto, axkaamta 1 ee xeerka baaragrafkaan haddii aanay ka horimaanayn oo sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda oo masuul ka noqonayo dacwadaha madaniga ee ka dhasha heshiisyada uu isagu galay isla markaana isagu uu

galay isagoo aan wakiil ka ahayn Dawladdiisa isaguna uu si gaara isku xilsaaray fulinteeda.

3. Ka sokow wixii la isla garto haddii xakaamta ku xusan baaragrafka 5 ee qod. 6 aanay u oggolayn sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda in uu diido tusidda dokumentiyada la xariirra heshiskaa noocaasa ee kor lagu soo sheegay ama uu si habboon uga ka markhaati furo.
   a) Sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda waxaa laga codsan karaa in ka hor uu sheego dacwado madani ah ama kuwa ciqaaba, ama dacwado ka socda garsoor kasta ee maamul ama Maxkamad kale, marka laga reebo xaaladaha ku xusan baaragrafka 5 iyo 6 ee qod. 12.
   b) masuulinta iyo ama maxkamadda codsatay markhaati furka sarkaal ama karaani qunsuliyadeed ee xil haya waa in uu qaadaa dhammaan tallaabooyinka caqligalka ah ee looga hortagi karo faragelinta hawlahiisa rasmiga ee xaafiiska waana in uu u dhaqmaa si waafaqsan xeerarka dalkiisa ka jira, isagoo marag-furka ku bixinaya hadal ama qoraal, isagoo joogo halka uu deggnyahay.
4. dhammaan baabuurta, marakiibta iyo dayaaradaha lagu diiwaangeliyay magaca sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda, waa in si ku habboon looga caymiyaa dhibaatooyinka cid saddexaad. Ficil kasta ee cid saddexaad oo si nidaamsan u geysata dhibaatooyinkaas waxaa loo qaadanayaa fal masuuliyadda ka timaaadda ay waafaqsantahay sida ku xusan baagrafka 2 ee xeerkaan, iyo haddii axkaamta baaraagarafka 5 qod. 12 mana siinayaan sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda xaq uu ku diidi karo in uu tuso dokumentiyada falkaas ku saabsan ama sidoo kale uu arrintaas ka markhaati furo.
5. Sarkaalka qunsuliyadda xilka haya, muddada idil ee uu haysto aqoonsiga rasmi ah oo jira ama oggolaasha kale sida xaaska iyo caruurtiisa aan qaan gaarka ahayn ee isaga la nool, laguma qaadi karo habka uu dhigayo xeerka dalka marka loo eego diiwaangelinta shisheeyaha iyo oggolaashaha joogitaanka.
6. karaaniga qunsuliyadda ee aan hayn xilka sarkaalka qunsuliyadda, haddii aanu ahayn muwaadin Dawladda deegaanka, waxaa lagu qaadi karaa xeerarka iyo nidaamyada dalka wixii ku saabsan soo gelidda joogitaanka, xakamaynta iyo cayrinta shisheeyaha.

**Qod. 14**

Sarkaalka qunsuliyadda xilka haya ma awoodo, haddii aan la weydiisan ama Dawladda soo dirsatay aanay u oggolaan, in lagu qaado xarig ku-meelgaara mid ka mida dalalka Dawladda deegaanka, wixii ku saabsan arrimaha ka baxsan waxqabadka xilkiisa caadiga, haddii aan lagu soo eedayn:

a) marka daalalka ku xusan baaragrafka 1 ee qod. 1, ee dambi ciqaabtiisu gaari karto ugy taraan saddex sano oo xarig ah;
b) marka dalalka ku xusan baaragrafka 2 ee qod.1, ee dambi ciqabtiisu gaarayso shan sano ama ka badan oo xarig ah.

**Qaybta 4aad**

Mudnaanta Maaliyadeed

**Qod. 15**

Dawladda soo dirsatay ama qofka jira ama qofka qanuunka oo iyaga u shaqynaya waxaa laga dhaafayaa nooc kasta ee canshuur (dawladeed, gobol, degmo iyo wixii kale oo la xariirta:

a) milkiyadda iyo gacan ku haynta cinwaan kasta ee dhulal, dhismayaal, qayb dhismo ee waxyaabaha la socda, oo si gaara loogu talgalay ulajeeddooyinka ku xusan baaragrafka 1 ee qod. 9 ee Heshiiskaan, marka laga reebo canshuurta iyo xushmadda ah ajuurada adeegyada dadweynaha ama cinwaanada wax lagu hagaajinayo, iyadoo loo eegayo halbeegga maguurtooyinka la soo sheegay sida looga faaidaysanyo;
b) qandaraasyada iyo arrimaha la xariira iibka hantida maguurtada oo ku wajahan ulajeeddooyinka kor lagu soo sheegay;
c) milkiyadda, gacan ku hayntaiyo isticmaalka hantida guurtada ah oo loo adeegsanaya ulajeedddooyinka qunsuliyadda.

**Qod. 16**

1.
   a) Wax canshuura iyo xushmo kale lama dabbaqi karo dalka Dawladda degaankuna laguma qaadi karo, ama wax kasta, Dawladda Gobol, Degmo iyo hay'ad maxalliya, xuquuqda ay qaadatay dawladda soo dirsatay oo lagu bixiyay hawlo qunsuliyadda loo qabatay, ama rasiid lagu baxshay xuquuqdaas;
   b) Dawladda soo dirsatay ama sarkaakla ama karaaniga qunsuliyadda waxaa laga dhaafayaa canshuurta iyo xushmadda kasta ee dalka ee la dabbaqayo ama ay qaadaan dawladda deegaanka, ama Dawlad kasta, Gobol, Degmo ama Hay'ad maxalliya, arrimaha la xariira hawlgalladooda xilalka sarakiisha iyo karaaniyada qunsuliyadda. Ka dhaafiddaas laguma dabbaqayo canshuurta ama wixii xushmado kale oo la mida kuwo haddii aay jiraan cid saddexaad la saari lahaa inkastoo culayska la saari karo Dawladda soo dirsatay ama sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda.
2. Wax canshuura ama xushmad ah lagama qaadi karo ama laga dhaafi karo dadka dalka deegaanka, ama Dawlad kasta, Gobol, degmo ama Hay'ad maxalliya, u ku saabsan ujuurooyinka, mushaaraadka ama gunnooyinka rasmiga, oo la siiyo sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda, oo lagu bixinayo xaaladaha lagu faah-faahiyay baaragraf-hoosaadka a) iyo b) ee baaragrafka 3 ee qodobkaan, oo ku saabsan adeegyada qunsuliyadda uu isagu qabtay.
3. Sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda, sidoo kale marka laga soo tago arrinta ku cad baaraagrafka 4 ee qodobkaan, waxaa laga dhaafayaa dhammaan canshuuraha iyo wixii xushmad kale ee dalka deegaanka ama Dawlad kale, Gobol, Degmo iyo Wakaalad kale oo maxalliya, marka laga reebo khidmooyinka iyo xuquuqda kale ee waajibaadka wax soo dejinta (import) dalka, dhaafiddaas waxa si gaara u nidaaminayo qod. 17, iyadoo markasta sarkaalka ama karaanigaas:
   a) haddii aanuu ahayn muwaadin Dawladda deegaanka; iyo
   b) dalka aanu ku lahayn mehered hawlo faiida laga helo; iyo
   c) uu la leeyahay xiriir shaqo joogto ah, ama haddii aanu xiriirkaas joogtada ah lahayn, aanu helin deggnaanshahiisa dalka markii laga shaqaaleysiyay qunsuliyadda
4.
   a) Axkaamta baaragrafka 3 ee qodobkaan waxaa lagu dhaqayaa kaliya canshuuraha iyo xushmadaha kale kuwaaso sarkalka ama karaaniga qunsuliyadda oo si sharci ahaan la saari lahaa, marka aau lahayn dhaafidda ku xusan qodobkaan, iyadoo aan lagu dhaqayn canshuurta iyo xushmadaha kale ee la mida oo sharciyan la saari lahaa qof saddexaad, inkastoo culuskaas uu ku dhici lahaa sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda. Haddiia, sikastaba sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda uu leeyahay dakhli ka yimid ilo dalka ka baxsan, hasayeeshe dakhligaas uu yahay mid isaga la siin karo, ama isaga

bangi ama wakiil dalka jooga uu u aruurin karo, kaasoo laga doonayo in uu ka soo gooyo canshuuraha daqliga marka la bixinayo lagana reebo gudbinta canshuurta si uu uga soo gooyay, sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda wuxuu xaq u leeyahay in loo celiyo canshuurta looga jaray qaabka kor ku xusan;

b) axkaamta baaraagrafka 3 laguma dabbaqayo:
   i. xushmadda lagu dabbaqayo ama laga qaado milkiyadda iyo gacan ku haynta hantida maguurtdada dalka taalla;
   ii. canshuurta dakhliga ila kale ka soo baxay ee dalka yaalla;
   iii. canshuurta, ama xushmadaha ama deeqaha la dabbaqayo ama lagu qaaday dalka oo ku saabsan wareejinta milkiyadda sababa la xariira geeri, waana marka sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadda uu geeriyoodo ama isagu yahay kan wax dhaxlaya;
   iv. xushmadaha deeqaha iyo qorallada sharci ee la xariira (kuwa, tusaale ahaan, xushmadaha ku saabsan iibka ama warejinta lacagta ama hantida) ama canshuurta shaabadda, canshuurta ama lacagta iyaga laga qaado;
   v. canshuurta quudka ama canshuuraha kale ee la mida, oo ay ka mid tahay kuwaaso aanay suurtgal ahayn in lagu daro canshuurta iyo xushmadda lagu dabbaqo ama laga qaadayo mulkiyadda, adeegsiga baabuurta, maraakiibta iyo dayaaradaha iyo qalabka raadiyeyaasha ito telefeeshinada ama shayada dhoofka lagu keenay si waafaqsan axkamta qod. 17.

**Qod. 17**

1. Dawladda soo dirsatay waxay u fasaxantahay in ay dalka kala soo degto, iyadoo laga dhaafayo canshuur kasta ama xuquud (dawladeed, gobol, degmo iyo mid kale) oo ku waajiba waxa uu soo dhofiyay iyo sabab la xariirta, sida qalabka xafiiska-alaabada guriga, agabka iyo shayaal kale, oo ay ku jiraan baabuurta, doonyo iyo dayaarado, oo si gaara loogu talagalay adeegsiga ulajeedooyinka xaafiiska qunsuliyadda;
2. 
   a) Sarkaalka qunsuliyadda, haddii uu qanciyo xaaladaha ku xusan baaragrafka 3 ee qod. 16, wuxuu xaq u leeyahay in uu dalka keensado, iyadoo laga dhafayo canshuur ama xuquuq kasta ee (dawladeed, gobol, degmo iyo mid kale) oo ku waajibtay wax soo dhoofintaas ama sabab la xariirata, shandadaha, agabka isticmaalka shaqsiga iyo shayada kale oo ay ku jiraan baaburta, maraakibkta, dayaradaha, haddii hantidaas loogu tala galay isticmaalka shaqsiga iyo kuwa xubnaha qoyskiisa ee isaga la nool. Canshuur dhaafiddaas waxaa lagu dhaqayaa hantida uu sarkaalku qunsuliyaddu uu wato immaashahiisa koobaad ee uu xaafiiska kula wareegayo ha ahaaddem imaashaha ku sii xiga, waxaa kalo lagu fidinayaa waxyaabaha kale ee uu la soo dego inta uu xilka qunsuliyadda hayo;
   b) Karaaniga qunsuliyadda haddii uu qanciyo xaaladaha gaarka ee ku cad baaragrafka 3 ee qodobka 16, wuxuu xaq u leeyahy keliya munaasabadda bilowga degganaashahiisa hore in uu dalka keensado, iyadoo laga dhaafayo canshuur ama xuquuq kasta (dawladeed, gobol, degmo iyo mid kale) oo ku waajibay wax soo dhoofintaas ama sabab iyada la xariirta, shandadaha, agabka iyo alaabada kale ee shaqsiga ee isticmaalka guriga haddii hantidaas si gaara loogu talagalay isticmaalkiisa shaqsiga iyo isticmaalka xubnaha qoyskiisa oo isaga la nool.
3. Waxaa ka baxsan, sida:

a) haddii Dawladda Deegaanka ay ku soo rogto shardi bixinta canshuur dhaafka ku xusan baaragrafka kore in ay soo wargaliso waxa kasta oo ay doonayso in ay la soo dagto ama ay dib u dhoofinayso in loo soo gudbiyo qaabka ay iyado u dejisay;
b) canshuur dhaafka lagu soo sheegay qodobka kore, isagoo ku eg keliya in loo keensado isticmaalka rasmiga ee sargaalka ama karaaniga qunsuliyaddaga ama shaqsiga, laguma darayo sikastaba sheyada loo keenay in in cid saddexaad loogu daneeyo ama loo iibiyo ujeeddo ganacsi;
c) Dawladda deegaanka waxay go'aamin kartaa in canshuur dhaafka ku xusan baaragrafka kore in aan lagu dabbaqin wixii ku saabsa shayada lagu kobciyo, lagu beero, laga soo saaro ama lagu warshadeeyo dalka ee la dhoofiyay iyadoo aan la bixin ama la soo celin canshuurtii ama xushmaddii ku waajibtay haddii dhoofintaasu aanay dhici lahayn;
d) sina axkaamtaan looma fasiri karo oggolaasho ah in dalka la soo galiyo shay kasta oo keenistiisa dalka si cad loo mamnuucay.

**Qaybta 5aad**

Awoodaha Guud ee Qunsuliyadda

**Qod. 18**

1. Sarkaalka qunsuliyadda wuxuu xaq u leeyahay in uu ilaaliyo muwadiniinta Dalka deegaanka iyo hantida iyo danahooda. Si ujeeddadaas loo gaaro wuxuu awoodaa nawaxigiisa:
   a) in uu la yeesho wadahadallo, la xariira iyo la taliyo muwaadin kasta ee dalka soo dirsaday;
   b) in uu helo macluumaad shil kasta oo ku saabsan danaha muwaadiniinta la soo soo sheegay;
   c) in gacan laga siiyo muwaadiniinta la soo sheegay dacwooyinka horyaalla masuulinta Dalka ama xiriirada ay masulintaas la leeyihiin, siiyana wixii looga baahdo, caawimaadda xagga sharciga arrintaas iyo isagoo ka wakiila iyaga uga tarjumaya masuulintaas, marka ay codsadaan oo ay oggoladdaan, ama u magaacabo turjubaan ulajeeddadaas;
   d) u jeediyo masuulinta maxalliga ee shaqada ku leh wixii ku siman nawaaxigiisa iyo kala xariiro isla iyaga xaafiisyada shaqada ku leh ee xukuumadda dhexe ee Dalka. Isagu ma awoodo, sikastaba, inuu ka jawaabo ama u gudbiyo ashtako dibolomaasiyeed Wasaaradda arrimaha dibadda ama Xaaffiska Arrimaha Dibadda, kolba sida xaaladuhu yihiin, marka laga reebo marka ay maqanyihiin wakiilada dibolomaasiinta Dawladda soo dirstay. Marka ashtakada noocaas ee la soo sheegay qoral lagu soo gudbiyo, sarkaalka qunsuliyadda masuulinta ama xaafiiska danaynaya wuxuu weydiisan karaa in uu ku soo tarjumo luqadda rasmiga ee Dalka.
2. Muwaadin ka mida Dawladda soo dirsaty wuxuu xaq u leeyahay in uu la xariiro markasta sarkaalka qunsuliyadda shaqada ku leh, marka laga reebo uu xiranyahay in uu ku soo booqo qunsuliyadda.

**Qod. 19**

1. Sarkaalka qunsuliyadda waa in lala socodsiiyaa si daahid la'aana masuliinta shaqada ku leh ee dalka marka muwadin ka tirsan Dalka soo dirsaday la xiro oo uu yahay maxbuus garsuge ah ama lagu hayo nawaaxiga degaankiisa;
2. Sarkaalka qunsuliyadda waa in lo oggolaadaa si daahid la'aana in uu soo booqdo oo sigaara ula soo hadlo iyo in uu qareen u qaban karo muwaadin kasta ee dalka soo dirsaday oo xiran garsugana ah ama wax la waydiinayo ama xaqa u leh in uu qaato racfaan waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta, inta lagu jiro muddada racfaanka lagu qaadan karo. Xiriirin kasta oo ku saabsan muwaadinkaas ee ku socda sarkaalka qunsuliyaddawaa in lala socodsiiyaa masuuliinta dalka;
3. Iyadoo aan meel looga dhacayn axkaamta ku xusan baaragrafka 2 ee qodobkaan, marka muwaadin ka mida dalka wax soo dirsaday uu xukun ku dhacay u xiranyahay, sarkaalka qunsuliyadda oo nawaaxiga deegaankiisa uu ku xiranyahay muwaadinka la soo sheegay, isagoo wargalinaya masuulinta shaqadaku leh, wuxuu xaq u leeyahay in uu soo booqdo. Booqoshadaasu waxay u dhacaysaa si wafaqsan nidaamyada xabsiyada ka jira Dalka muwaadinku ku xiranyahay, ka sokow wixii lagu heshiiyay sikastaba nidaamyadaas waa inay oggoladaan suurtagalnimada boqashada muwaadinkaas iyo in isaga lala hadlo.

**Qod. 20**

Sarkaalka qunsuliyaddu wuxuu awoodaa, wixii ku siman nawaaxigiis:

1.
   a) in uu qaado caddaymaaha uu sheegayo xeerka muwaadininimada Dawadda soo dirsatay;
   b) in uu diiwaangeliyo adeegyada qaranka ee qasabka ah ee Dalka soo dirsaday iyadoo si iqtiyaariya loo jeedinayo qaababkaas, in ay farriimo ka soo saaraan, iyo in uu qaado caddaymaha muwaadinkaas, si waafaqsan xerarka Dawladda soo dirstay oo la xarriira adegyada qaran ee qasabka ah;
   c)
      i. in uu diwaangeliyo dhalashada iyo dhimashada muwadinkan Dalka soo dirsaday;
      ii. in uu minguuriyo guurka lagu sameeyay si waafaqsan dalka, marka qof ka mida dhinacyada uu yahay muwaadin Dalka soo dirsaday;
      iii. xafladda guurka, marka labada dhinac ay yihiin muwaadiniin Dalka soo dirsaday taasoo ay shardi tahay in xafladdaasu ay oggolyihiin xeerarka dalka sida la wada ogyahay sikastaba diiwaangelinta dhalashada iyo dhimashada ama minguurinta ama xafladaha guurka la soo sheegay kama cafinayso qaab kastaba qofka daneynaya u hoggansanaanta axkaaamta xeerarka dalka ee la xariira wargalinta masuuliinta Dalka diiwangelinta dhalashada, dhimashada iyo guurka;
   d) qaadaann caddaymaha lagu aqoonsanayo caruurta aan guurka ku dhalan oo samaynaya muwaadiniinta Dawladda soo dirsaday, haddii caddayntaasu ay waafaqsantahay xeerarka Dalkaas.

e) in ay bixiso baasaboorada iyo dokumentiyada safarada muwaadiniinta Dawladda soo dirsatay iyo ay bixiso fiisooyinka iyo dokumentooyinka kale ee caynkaas oo la siinayo dadka doonay in ay aadan dalka soo dirsaday;
f) bixinta shahaadooyinka asalka iyo danaha, ee ku saabsan badeecadaha, laga isticmaalayo dalka soo dirsaday;
g) wargaliyaan waraaqaha sharcyaysan ee maxkamadaha iyo in ay qaadaan markhaatiyo iyoo ka wakiil hay'adaha garsoorka Dawladda soo dirsatay qaab waafaqsan heshiisyada gaarka oo nidaaminaya arrimaha ka dhexeeya labada dhinac ee heshiiskaan galay ama sikastaa qaab aan ka hor imaanayn xeerkaan Dalka.

2. in ay sameyaan waraaqaha notaayada, qoraan iyo qaadaan caddaymaha iyo sharciyeeyaan, tasdiiqiyaan ama ay hubiyaan saxiixyada ama, dokumentiyada, tarjumaan dokumntiyada, dhammaan mararka adeegyadaas uu soo waydiisto muwaadin ka mida Dalka soo dirsatatay qaab waafaqsan xerarka ka jira Dalka. Haddii iyadoo lagu saleynayo axkaamta xeerarkaas la weydiisto in dhaar la qaado ama caddayn, dhaarta waa la qaadi kara, caddayntana waa la bixin karaa. Sarkaalka qunsuliyadda wuuu kaloo awoodaa, in uu qabto xilalka kor lagu soo sheegay oo ku saabsan dokumentiya uu weydiistay muwaadinka Dawladda soo dirsatay iyo in laga isticmaalo meel ka baxsan Dawladdaas, ka sokow waxii lagu heshiiyay, sikastaba axkaamtaas kuma waajibinayso Dawladda dalka la deggnyahay in aqoonsato waraaqaha notaayada ama waraaqaha kale.

**Qod. 21**

1. Sarkaalka qunsuliyadda, wuxuu xaq u leeyahay, wixii ku siman nawaaxiga deegaankiisa ee la xariira xuquuqda u sugnaatay kuna salaysan shuruucda caymiska bulshada Dawladda deegaanka. Marka la eego ulajeeddadaas isagu wuxuu awoodaa, haddii loo baahdo:
   a) in uu ka caawiyo muwaadiniinta masuulinta shaqada ku leha ee dalka;
   b) in u qaado muwaadiiinta, aan dalka daganayn lacagaha ay mutaystaeen ee ku salaysan shuruucda la soo sheegay.
2. haddi khilaaf ka jiro axkaamta heshiiska gaarka e ku saabsan caymiska bulshada ee ka jira Dhinacyada Sare ee Heshiiskaan iyo axkaamta baaragarafka 1 ee qodobkaan, waxaa la dabbaqayaa axkaamta koobaad ee heshiiska la soo sheegay.

**Qod. 22**

Sarkaalka qunsuliyadda wuxuu awoodaa, wixii ku siman nawaaxiga deegaankiisa, in uu daryeelo danaha Dawladda soo dirsatay arrimaha ku saabsan:

a) ganacsiga;
b) hawlqabadyada farshaxanka, cilmiga sayniska, xirfadaha iyo dhaqanka;
c) dal-ku-galka iyo muhaajitnimada.

**Qaybta 6aad**

Dhaxalka iyo wareejinta hantida

**Qod. 23**

1. Marka qofka geeriyooda uu hanti ka tago ku sugan dalka iyo xuquuq cayn kasta ee hantidaas (tusaale qofka loo magacaabay xafidaha dardaaranka ama midka loo dardaarmay ee dhaxalka sharciga ama dardaaranka u sugnaaday ama uu sheeganayo muwaadin Dawladda soo dirstay oo aan degganayn dalkaas ama aan wakiil sharci ku lahayn, sarkaalka qunsuliyadda ee ku sugan deegaanka laga maamulayo dhaxalka qofka

geeriyoday ayaa maamulaya ama, haddii aan la samayn wax maamula, hantida meesha taalla, isaga ayaa xaq u leh in wakiil ka noqdo muwaadinkaas wixii ku saabsan xuquuqdiisa iyo danahiisa dhaxalka ama hantidiisa sidii isagoo daneeyuhu uu sarkaalka qunsuliyadda siiyay wakaaladda joogta ah. Haddii mar dambe muwaadinkaasu magacaabo qof uga wakiil noqda dalka, maqaamka sarkaalka qunsuliyadda wuxuu noqonayaa wakiil qof muwaadina oo ay joogsatay wakiilnimadiisa tariikhada sarkaalka qunsuliyadda uu muwaadinkaasu soo wargaliyo in cid kale uu wakiishay., ama haddii sarkaalka qunsuliyadda loo oggolaaday in uu maamulo, si waafaqsan axkaamta baaragrafka 3 ee qodobkaan, laga soo bilaabo marka dambe ee muwaadinkaasu uu siiyay oggolaashaha maamulka ama uu codsado wakiilkiisa sharciga.

2. Axkaamta ku xusan baaragrafka 1 ee qodokaan waxaa lagu dabbaqayaa wax kasta ha ahaadeen muwaadininimada marxuumka iyo meesha uu ku dhintay.
3. Marka sarkaalka qunsuliyadda uu yahay wakiilka wuxuu qaadayaa tallaaboyinka loo baahanyahay oo lagu ilaalinayo iyo lagu xafidayo xuquuqda iyo danaha qofka uu wakiilka ka yahay. Sido kale isaga waa in loo aqoonsadaa xaqa gacan ku haynta dhaxalka ama hantida sida isagoo loo magacaabay wakiilka qofka xuquuqdiisa iyo danahiisa, oo aanay ku jirin, marka in qof kale, oo haysta xuquuqdaas mid la mida ama ka horreyay, ay qaaday tallaabo looga baahanyahay gacan ku haynta iyada. Marka la eego xeerarka dalka haddii loo baahanyahay oggolaashaha maamulka ama qaraar maxkamadeed oo awood siinaya sarkaalka qunsuliyadda in uu ilaaliyo iyo inuu gacanta ku hayo hantida, oggolaashaha maamulka ama tallabada loo baahanyahay in la siiyo wakiilka uu qofku u soo xilsaaray danahiisa waxaa ka wakiila sarkaalka qunsuliyadda waxaa la siinayaa sarkaalka la soo sheegay marka uu weydiisto. Walaxaha muujinta baahida deg-degga ee ilaalinta ama xafidaadda dhaxalka iyo jiritaanka dadka danaha ka leh oo sarkaalka qunsuliyadu xaq u siinaya in uu ka wakiil noqdo, masuuliinta maxkamaduhu waxay soo saarayaan, qaraaro haddii bahidaas la lala ogaado, oggolaasho amase qaraar loogu oggolaanayo sarkaalka qunsuliyadda ilaalin iyo xafidaad xaddidan ee dhaxalka, illaa inta laga soo saarayo oggolaasho cusub oo wax lagu maamulo.
4.
   a) Marka laga soo tago, sida ku xusan baaragraf-hoosaadka b) iyo c) ee baaragrafkaan, sarkaalka qunsuliyadda wuxuu leeyahay maamulka buuxa ee dhaxalka qaabka sida isagoo u soo magaacay wakiil qofka danahiisa u ilaaliya. Marka la eego xeerka dalka haddii loo baahanyahay oggoolaasho wax lagu maamulo oo ay bixixiyaan masuulinta maxkamadaha, sarkaalka qunsuliyadda wuxuu xaq u yeelanayaa in uu codsado oggolaashahaas iyo iyo in uu helo oggolashaha la soo sheegay si uu ku maamulo isago ah wakiil uu magacaabay isla qofka xuquuqdiisa iyo danahiisa la ilaalinayo;
   b) Masuliinta maxkamadaha waxay awoodaan, haddii ay la habboonaato, in dib loo dhigo bixinta oggolaashaha maamulka la siinayo sarkaalka qunsuliyadda dhammaan muddada loo arko in loo baahanyahay si loogu suurtagaliyo qofka uu sarkaalka qunsuliyadda ka wakiil yahay uu la socdo iyo go’aan ka gaaro haddii uu doonayo in uu wakiil noqdo sarkaalka la soo sheegay;

c) Masuulinta maxkamadaha waxay awoodaan, haddii ay la habboonaato, in ku amaraan sarkaalka qunsuliyadda inuu keeno muujin loo qaateen ah in dadka danaha ka leh ay heleen dhaxalka guud ay sharci ahaan xaq u leeyihiin ama marka aan la siin karin muujintaas, in ay u soo celiyaan dhaxalkaas masuulinta iqtisaaska ku leh ama dadka isaga xaqa ku yeelan lahaa. Masuuliinta la soo sheegay sidoo kale waxay amri karaan, haddii sarkaalka qunsuliyadda uu haysto awoodda maamulka buuxa ee dhalxaka, in wareejinta faaiidada dhaxalka dadka kor lagu soo sheegay ay u dhacdo qaabka iyaga loo soo sheegay muddada ay dalka ku safrayaan ama ay meelo ku sii hakanayaan iyagoo aan degganaasho ku lahayn, sarkaalka qunsuliyadda ee nawaaxiga deegaankiisa muwaadinkaasu ku geeriyooday wuxuu xaq u leeyahay, si uu u badbaadiyo lacagta iyo waxyaabaha uu marxuumku ka tegay in uu si deg-degga gacanta ku dhigo. Marka laga soo tago xuquuqda masuliinta maxkamadaha ama maamulka dalka oo ah in hayaan lacagahaas iyo wuxuu lahaa marka sidaas ay danta caddaaladda ku jirto ama baarista lagu xaqiijinayo dambi. Xaqa lagu xafidayo gacan ku haynta ama habaynta lacagta la soo sheegay iyo wuxuu lahaa waa in adeegsadaa si waafaqsan xeerarka dalka ka jira iyo axkaamta baaragrafka kore ee qodobkaan.

6. Haddii sarkaalka qunsuliyadda uu si nidaamsan u qabto xuquuqda ku xusan baaragrafka, isaga wixii ku saabsan diiwaangalinta waxaa lagu dhaqayaa garsoorka maxkamadaha dalka sida qaabka loola dhaqmo muwaadin dalka deegaanka.
7. Haddii masuulinta maxalliga ee dalka ha ahaadeen kuwa maamulka ama garsoorka ay ogaadaan, waxay wargalinayaan sarkaalka qunsuliyadda:
   a) in dhaxal uu ka furanyahay dalka iyadoo sarkaalka qunsuliyadda uu xaq u leeyahay ilaalinta danaha si waafaqasan baaragrafka kore ee qodobkaan; ama
   b) muwaadin dalka soo dirsaday uu dalka ku dhintay maraka ay caddaato in aanay joogin cid si sharci ah uga wakiil ah dalka, oo ka duwan maamule dawladeed ama sarkaalkale oo leh awoodahaaso, kaaso xaq u leh in uu codsado maamulka hanti kasta ee uu marxuumku ka tegay.

**Qod. 24**

Sarkaalka qunsuliyadda wuxuu ka qaban karaa masuuliinta garsoorka oo qof shaqsi ah ama mid shaqsiyad qaanuuneed, si uu u gudbiyo Dawladda ……soo dirstay muwaadin aan dalka daganayn, lacag iyo hanti uu muwaadinkaasu leeyahay kadib markii qof dhintay. Lacagtaas ama hantida waxaa ku jiri kara, oo aan gaar ku ahayn qoondaha dhaxalka, lacag-bixinadii la sameeyay ee ku saleysan shilalka shaqada ama xeerar kale oo la mida sida caymiska nolosha. Maxkamadda, qofka jira ama kan qaanuuniga oo ku hawlan dib u celinta waajib kuma aha in uu lacagtaas ama gudbiyo isagoo si marsiinaya sarkaalka qunsuliyadda, iyadoo kan dambana aanay waajib ku ahayn in uu qaado si uu u gudbiyo. Haddiiba sarkaalka la soo sheegay uu si rasmiya u qaado lacagta ama hantida la soo sheegay, isagu waa in uu u hoggaansamaa shurudaha ay maxkamaddu ay u goysay, qofka jira ama kan qaanuuniga, wixii ku sabsan muujinta loo gacan galinayo lacagta iyo hantida dadkii danaha ka lahaa …………maa muuqdo qoraalku….

**Qod. 25**

Lacagta iyo hantida kale waa loo dhiibi karaa ama lagu wareejin karaa sarkaalka qunsuliyadda si waafaqsan axkaamta qodobada 23 iyo 24 keliya cabbirka, iyo xaaladaha waxa loo dhiibay in uu u gacangaliyo ama ku wareejiyo arrimahaas qofka uu sarkaalka qunsuliyaddu ka wakiil yahay ama waxa uu isagu u qaadayo ay oggolyihiin xeerarka iyo nidaamyada Dawladda degaanka ka jira. Sarkaalka qunsuliyadda ma laha waxa quseeya lacagta iyo hantida la sheegay xuquuq ka badan waxa uu lahaan lahaa qofka uu wakiilka ka yahay ama uu wax u qaadayo, haddii lacagta iyo hantida la soo sheegay, la siiyay ama lagu warejiyay isla qofkaas.

**Qaybta 7aad**

Gooshidda Biyaha

**Qod. 26**

1. Markab ay leedahy Dawladda soo dirsatay haddii uu yimaado dakad (oo muddada lo tilmaamay dhammaan meelaha uu markab ku xiran karo) ee Dawlada deegaanka, sarkaalka qunsuliyadda ee nawaaxiga degaankiisa ay dakaddu ku taallo, waxaa loo oggolyahay in uu si xora u qabto hawlahiisa ku xusan qod. 27, iyadoo aanay soo faragelin masuuliinta dalka. Sarkaalka qunsuliyadda wuxuu ka codsan karaa masuuliinta dalka in ay gacan ka siiyaan wax kasta oo ku saabsan waxqabadyada hawlahaas iyago masuulintana ay waajib ku tahay kaalmada la weydiistay, marka laga soo tago jiritaanka sababa gaara oo si buuxda u cudur daaraya diidmada ah in ay kaalmeeyaan xaaladaha qaarkood.
2. Si loo gaaro ulajeeddadaas, sarkaalka qunsuliyadda, oo ay la socdaan xubnaha shaqaalahiisa haddii uu doono, wuxuu tagin karaa qof ahaan goobta markabku joogo, kadib marka la oggolaado in si xora lo sameeyo tijaabada/waraaqaha shaqada. Taliyaha markabka iyo xubnaha kuuliga waxaa loo oggolyahhay in ay la xariiraan sarkaalka qunsuliyadda iyo xitaa in ay Xaafiiska qunsuliyadda tagaan, haddii masuulinta deegaanka aaanay iskood u diidin mararka waqti badan lumayo ama meeshu ay fogtahay. Markaaso kale masuuliinta la soo sheegay waxay si deg-degga u wargalinayaan sarkaalka shaqada ku leh.

**Qod. 27**

1. Sarkaalka qunsuliyadda wuxuu su'aalo weydiin karaa taliyaha markabka iyo shaqaalaha, wuxuu eegi karaa dokumentiyada markabka, qaban kara caddaymaha la xariira marinada socdaalka iyo meesha uu u socdo iyo guud ahaan in uu fududeeyo imaashaha iyo bixidda markabka.
2. Sarkaalka ama karaaniga qunsuliyadad wuxuu u raaci karra taliyaha ama xubnaha shaqaalaha maxkamadaha hortooda iyo masuuliinta kale ee maxalliga, wuxuu siin karaa kaalmo (oo ay ku jiraan………….

   Xuquuqdaas sina looma xaddiidi karo haddii si ka duwa aanay u dhigin xeerarka dalalka xaaladaha khuseeya nabadgalyada Dawladda.
3. Iyadoo aan wax loo dhibayn xuquuqda ay leeyihiin masuuliinta garsoorka dalka in ay garsooriddooda u qabtaan si waafaqsa baaragrafka 1 ee qodobka 29, sarkaalka qunsuliyadda wuxuu go'aan ka gaari karaa muranada ka dhexeeya taliyaha iyo xubnaha kuuliga, oo ay ku jiraan arrimaha khuseeya mushaaraadka iyo heshiisyada shaqaalaynta, tallaabo ka qaado hawlgalinta iyo ruqsaynta taliyahan iyo xubnaha shaqalaha. Isagu

wuxuu kaloo qaadi karaa tallaabooyinka loo baahanyahay ee lagu xasilinayo nidaamka iyo anshaxa markabka guudkiisa.

4. Sarkaalka qunsuliyadda wuxuu awoodaa, haddii loo baahdo, inuu isbitaal jiifiyo iyo inuu taliyaha dalkii ku celiyo ama xubnaha kuuliga.
5. Sarkaalka qunsuliyadda wuxuu qaban karaa, qori karaa in uu sameeyo caddayn kasta, qoraal lagu wareejinayo ama dokumentiyo kale oo uu xeerarku jidaynayaan in uu u diro Dawladda soo dirsatay iyo wixii la xariira:
   a) warejinta iyo tirtiridda diiwaanka Dawladda soo dirsatay ee markab kasta;
   b) wareejinta milkiyadda markabka diiwaanka la soo sheegay; ama
   c) diiwaangelinta rahan kasta ama dammaanadda markabka Dawladda la soo sheegay.
6. Sidoo kale, sarkaalka qunsuliyaddu wuxuu qaadi karaa tallaabooyinka lagu fulinayo xeerarka Dawladda soo dirsatay arrimaha ku saabsan gooshka biyaha.

**Qod. 28**

1. Haddii qof ka mida kuuliga uu ka fakado Dawladda soo dirsatay oo ku sugan dekad Dawladda deegaanka, masuliinta garsoorka iyo maamulka ee dalka waa in ay weydiistaan sarkaalka qunsuliyadda shaqada ku leh ee Dawladda soo dirsatay, in uu kala shaqeeyo sidii loo qaban lahaa midka fakadka ah iyagoo muujinaya fakashadaas, sidii loo hayn laha iyo loo amri lahaa in markabka la saaro ama loo dhiibo taliyaha ama milkiilaha markabka amase wakiilka midkaas si loo geeyo markabka guudkiisa. Ka sokow wixii lagu heshiiyo, sikastaba, masuuliint,a la soo sheegay laguma qasbi karo in ay hayaan qofka fakaday muddo ka badan laba bilood, waana in ay markasta la xariiraan sarkaalka qunsuliyadda wixii khuseeya amarada lagu qaadayo ee isaga la xariira, inta aanay dhicin muddada haynta.
2. Masuulinta dalka, sikastaba, kuma qasbana in ay qaadaan tallaabooyinka ku xusan baaragrafka kore:
   a) marka kuuligu uu yahay muwaadin Dawladda degaanka;
   b) ay jiraan sababa muuqda in nafta iyo xorriyadda kuuliga ay khatar ku jirto sababa la xariira qolada, qowmiyadda, fikirka siyaasadda ama diinta, oo ay suurtagal tahay inuu markabku tago mid ka mida dawladahaas.
3. Haddii qofka fakadka ah uu dambi ku eedaysanyahay (ka duwan fakadka) oo lagu qaadi karo xeerarka dalka, amse haddii uu ku dhacay xukun, masuuliinta dalka kuma qasbana in isaga markabka la saaro ama loo dhiibo kabtanka ama milkiilaha amse masuulka markabka ama wakiilkiisa illaa laga xakumo ama iyo uu dhammaysto ciqaabta lagu xakumay.

**Qod. 29**

1. Haddii aan la weydiisan ama aanu oggolaan sarkaalka qunsuliyadda, masuuliinta maamulka dalka ma soo faragelin karaan arrimaha quseeya maamulka gudaha markabka. Masuliinta garsoorka dalka ma bilaabi karaan wax dacwada oo ku saabsan muran xagga mushaaradka iyo heshiisyada dhexmaray kabtanka iyo xubnaha shaqaalaha iyadoo aan la wargalin sarkaalka qunsuliyadda ee shaqada ku leh sidoo kale ma bilaabi karaan haddii dacwadda salkaalkaas la soo sheegay uu diido. Masuliinta maamulka iyo garsoorka ma soo faragelin karaan marka mid kuuliga ka mida lagu xiro markabka guudkiisa arrima la

xariira dambiyo anshax-marin, haddii xariggaasu uu waafaqsanyahay xeerarka Dawladda soo dirsatay iyo xaaladaha xarigga ay cudur daar la'aan yihiin kuwa culus ama kuwaasu ay dhibaato u keenayaan maxbuuska;

2. Masuuliinta degmada, marka la weydiisto ama sarkaalka qunsuliyaddu uu u oggolaado:
   a) ma soo dhexgeli karaan arrimaha ka dhasha markabka guudkiisa oo lagu xasilinayo deggnaanshaha iyo kala dambaynta ama danaha caafimaadka iyo nabadgalyada guud;
   b) ma bilaabi karaan dacwado ciqaaba oo la xariira dambiyo markabka guudkiisa ka dhacay, haddii dambiyadaas:
      i. aanay carqaladayn degganaanshaha iyo ammaanka dekedda ama xeerka dalka ee la xariira caafimaadka, muhaajirnimada, nabadgalyada nolosha badda, arrimaha kastanka iyo arrima kale oo la mida; amase
      ii. ay galeen ama liddi ku ah dad aan ahayn taliyaha ama xubnaha shaqaalaha, dad haysta muwaadinimada Dawladda deegaanka ama liddi ku ah iyaga, amse
      iii. 1. xaaladaha dalalka lagu sheegay baaragarfka 1 ee qod. 1, marka damibga lagu ciqaabi karo yahay ugu yaraan laba sano oo xarig ah; 2. Xaladda dalalka ku xusan baaragarfka 2 ee qodobka 1, marka dambiga lagu ciqaabi karo shan sano oo xarig ah.
3. Marka, la adeegsanayo xuquuqda ku xusan baaragrafka 2 ee qodobkaan, masuuliinta dalka ee doonaya in ay qof xiraan ama ay wax weydiiyaan ama qabtaan hanti ama ay baaris ka sameeyaan markabka guudkiisa, waa in la siiyaa fursad taliyaha ama sarkalka kale oo isaga ka wakiila in uu wargaliyo sarkaalka qunsuliyadda, marka laga reebo xaaladda ……..…………………………

in isaga la wargaliyo si loogu oggolaado isaga ama wakiilkiisa in ay goobta joogaan, haddii ay doonayaan. Haddii sarkalka qunsuliyadda aanu meesha joogin ama aanay cidna wakiil ka ahayn isagu wuxuu xaq u leeyahay, marka uu codsado in ay masuulinta dalka ay siiyaan macluumadka idil wixii meesha ka dhacay. Sikastaba axkaamta baaragrafkaan laguma dabbaqayo codsiga caadiga ee ku saabsan arrimaha kastanka, caafimaadka iyo oggolaashaha shisheeyaha ama qabashada markabka ama qayb kasta oo ka mida xamuulkiisa oo la xariira dacwad madani ah ama ganacsi oo ka socota masuuliinta garsoorka hortooda ee dalka.

## Qod. 30

1. Sarkaalka qunsuliyadda wuxuu xaq u leeyahay, haddii taliyaha markabku u oggolaado, in uu ilbaadiyo, dekadaha ay ku yaalliin wixii ku siman nawaaxiga deegaankiisa, markab kasta oo sita calanka oo ku wajahan deked ku taalla dalka soo dirsaday, si uu u helo macluumaadka looga baahanyahay diyaarinta iyo qorista dukumentiyada sharci ahaan la weydiin karo shuruudaha gelitaanka markabka dekedaha dalkiisa, iyo si loo siiyo masuuliinta shaqada ku leh Dawladda soo dirsatay arrimaha caafimaadka iyo wixii kale ee masuuliinta la soo sheegay ay ka doonayaan
2. Sarkaalka qunsuliyadda waa in uu ku dhaqmaa sida uga habboon ee suurtagalka ah oo uu siinayo xuquuqda xeerkaan.

## Qod. 31

1. Haddii marakab dawladdasoo soo dirsatay uu ku dego dhulka Dawladda deegaanka, sarkaalka qunsuliyadda nawaaxiga deegaankiisa uu ka dhacay shilku waa in masuulinta shaqada ku leh ee dalka deegaanka ay ku wargaliyaan sida ugu dhaqsiyaha badan dhacdada.

2. Masuuliinta shaqada ku leh ee dalka waa in ay qaadaan tallaabooyinka idil ee suurtaglka ah si loo badbaadiyo markabka, dadka, xamuulka iyo hantida kale ee markabka guudkiisa saaraan, sidoo kale in laga hortago ama la cadaadiyo bililiqada ama rabashado ka dhaca markabka guudkisa, Tallaabooyinka la soo sheegay waxaa la adeegsadaa xitaa wixii quseeya shayada uu markabku leeyahay ama ka mida xamuulka uu sido iyo in laga fogeeyo markabka. Haddii markabku uu ku dego dekad dhexdeed ama ay dhibaato ku soo gaarto isago gooshaya bad -dhuleedka dalaka Dawladda deegaanka, masuuliinta dalka waxay amri karaan in la qaado tallaooyinka ay u arkaan lagama maarmaan si looga hortagod dhibaatooyinka soo gaari gara markabka qalabka dekadda ama maraakiibta kale.
3. Xaaladaha marka uu markabku uu ku dego dhexdeeda uu soo galay ama uu dhiibaato ku keno safarada biyaha dalka Dawladda deegaanka, masuulinta dalka waxay amri karaan in la qaado tallaabooyinka loo baahanyahay si looga hortago dhibaatooyinka uu u geysan karo maraakiibta iyo qalabka dekedda iyo marakibta kale.
4. Marka milkiilaha iyo wakiiladiisa (ama caymiyeyashiisa danaha ka leh), taliyaha aanu awoodi karin in uu u la galo heshiisyada loo baahanyahay, sarkaalka qunsuliyadda waxaa loo tixgalinayaa in uu loo oggolyahay qaadista talloobooyinka uu qaadi lahaa milkiilaha haddii uu joogi lahaa, si markabla looga dhiga mid u hoggaansama xeerarka dalka deekaanka.
5. Lama dabbaqayo canshuuraha kastanka (sidoo kale canshuuraha kale ee laga qaado dhoofka dalka la soo geliyo ama sabab iyada ah) ee masuulinta dalka, xamuulka ama sahayda, qalabaynta, shayada la sido ama qayb ka burburka, haddii aan dhulka la keenin si loo isticmaalo ama loogu quuto dalka, masuulinta dalka, sikastaba, haddii ay habboonaato waxay weydiisan karaan dammaanad si loo badbaadiyo dakhliga canshuuraha wixii quseya hantida la soo sheegay.
6. Wax canshuura ( oo aan ahayn canshuurta kastanka, marka lagu dhaqmayo baaragrafka 5 ee qodobkaan) masuuliinta dalka ma qaadi karaan wixii ku saabsan burburka, xamuulkiisa iyo shayada kale ee saaraan markabka guudkiisa, wixii aan ahayn isla noociisa iyo isla tirada laga qaadi lahaa xaaladahaaso kale maraakiibta Dawladda deegaanka.

**Qod. 33**

1. Maamuulka shaqada ku leh ee Dawladda deegaanka, haddii taliyaha ama xubin ka mida shaqaalaha markabka ee Dawladdaas, muwaadin dalka soo dirsday, uu ku dhinto inta uu ku jiro safarka badda ama Dawlad kasta, waa in uu dhiibaa sida ugu dhaqsiyaha badan sarkaalka qunsuliyadda shaqada ku leh ee Dawladda soo dirstay nuqullada xisaabaadka uu qabtay, mushaarooyinka, saamynada iyo hantida uu taliyuhu lahaa ama kuuliga dhintay isagoo ku wargalinaya dhammaan macluumaadka qoraal maamulkiisa kuwaaso sahli kara baadi goobka dadka leh xaqa dhaxalka qofka geeriyooday.
2. Dhammaan mararka qiimaha mushaarooyinka iyo waxyaabaha uu lahaa taliyaha ama kuuliga dhintay oo ay wehliyaan wax kasta uu lahaa oo hoos imaanayay masuuliinta maamulka Dawladda deegaanka oo aan ka badanayn 100 isterliin ( marka lacagta kolba aan lagu xaddidi karin liiraha heshiisyada Dhinacyada Sare ee kaan galay) marka masuuliinka shaqada ku leh uu yahay xubin ka tirsan Jamhuuriyadda Talyaaniga, maamulka shaqada ku leh wuxuu aqoonsanayaa qofka xaq laha ee dhaxalaya hantida qofka dhintay, haddii uu yahay daynle, qofkaasuna uu deegaan ku leeyahay Dawladda soo dirsatay, maamulka shaqada ku leh wuxuu u dhiibayaa sarkaalka qunsuliyadda mushaarooyinka, saamaynada iyo hantidii iyagu ay hayeen, oo ahaa milkiga taliyaha ama kuuliga dhintay. Sikastaba, isla maamulku wuxuu xaq u leeyahay ka hor inta aanu dhiibin,

in uu ka bixiyo hantida taliyaha ama kuuliga dhintay ee uu isaga maamulkiisa hoos imaanayay dayn kasta oo dhaxalka ay dad deegaanka ku sheeganayaan ama xitaa Dawladda soo dirsatay maraka maamulkaasa uu xaqiijiyo jiritaanka dayntaas. Dayn kasta oo liddi ku ah dhaxalka taliyaha ama kuuliga dhintay oo la soo bandhigay maamulkaas ka dib marka la wareejiyo waxaa la wargelinayaa maamulada ku shaqada leh e Dawladda soo dirsatay. Haddii, wargalinta cagsigeeda mid ka mida Dhinacyada Sare ee Heshiiskaan gaaray, maamulka shaqada ku leh sida loo kala xusay, wixii quseeya Jamhuuriyadda Talyaaniga, Wasaaradda Ganacsiga Badda iyo, wixii quseeya Boqotooyada Wasaaradda Gaadiidka iyo Garoomada Rayadka ee Midowga Boqortooyada.

3. Dhammaan mararka kale ee maamulka shaqada aanu u dhiibi karin sarkaalka qunsuliyadda mushaarooyinka, saamaynada iyo hantida kale ee uu lahaa taliyaha ama kuuliga dhintay, ee isagu masuul ka ahaa marka ay dhaceen xaaladaha ku xusan baaraagrafka 2 ee qodobkaan, maamulka shaqada ku leh, inta aanu dhiibin hantida dhaxalka qofka xaqa u leh, waa in lala socodsiiyaa sarkaalka qunsuliyadda ulajeedddadaas, isagoo tilmaamaya qofka la doonayo in loo dhiibo hantida la soo sheegay si loo siiyo sarkaalkaa suurtaganimada caqligalaka ee macluumaadka wax ka taraya go'aanka ugu dambeeya ee laga gaarayo qofka xaqa u leh in loo dhiibo hantida qofka laga hadlayo ama jiritaanka daymo kale oo dhaxalka lagu leeyahay oo maamulku aanu ogayn.
4. Axkaamta baaragarafka 2) iyo 3) ee qodobkaan laguma dabbaqayo marka, iyadoo loo baahanyahay in dhanka masuulinta garsoorka ay bixiyeen oggolaasho wax lagu maamulayo, maamulka shaqada ku leh wuxuu u dhiibayaa hantida uu hayo qofka la siiyay oggolaashahaas isagoo wargalinaya sida ugu dhaqsiyaha badan sarkaalka qunsuliyadda.

## Qaybta 8aad

Xeerar Guud

### Qod. 34

Axkaamta qodobada 18 iyo 33, ee ku saabsan xilka uu sarkaalka qunsuliyaddu qaban karo waa kuwa qasab ah. Sarkaalka qunsuliyadda waxaa loo oggolyahay xitaa in uu qabto, haddii:

a) ay yihiin wax sharciga waafaqsan iyo dhaqanka caalamiga ee ku saabsan saraakiisha qunsuliyadaha sida dalka looga aqoonsanyahay, amase;
b) aanay khilaafsanayn xeerarka dalka iyadoo masuulinta dalka aanay diidin qabashada hawlahaas.

### Qod. 35

Ka sokow wixii lagu heshiiyay dhammaan xaaladaha qodobada Heshiiskaan uu aqbalo sarkaal qunsuliyadeed Dawladda soo dirsatay ayay u taallaa in ay soo xaddido tallaabooyinka ay saraakiishoodu qaadi karan gudashada xaqaas.

### Qod. 36

Sarkaalka qunsuliyadda wuxuu awoodaa, wixii ku siman nawaaxigga deegaankiisa, in uu qaado xuquuqda iyo canshuuraha ay jidaysay Dawladda soo dirsatay wixii ku saabsan hawlaha qunsuliyadda.

**Qaybta 9aad**

Axkaamta Gunaanadka

**Qod. 37**

Kkilaaf kasta oo ka dhalan kara Dhinacyada Sare ee Heshiiskaan ee ku saabsan fasiraaadda iyo ku dhaqanka axkaam kasta ee ku saabsan Heshiiskaan wuxuu noqonayaa marka uu codsado iyaga mid ka mida, mid loo gudbiyo Maxkamadda Caalamiga e Garsoorka, marka laga reebo xaalad gaara oo dhiacyaduu aanay ku heshiin in khilaafka ay geeyaan maxkamadda kale iyagoo adeegsanay habraac ka duwan.

**Qod. 38**

1. Mid kasta ooka mida Dhinacyada Sare ee Heshiskaan. Inta aanu dhaqangalin Heshiiskaan, waa in uu qoraal ku wargeliyaa Dhinaca kale qaabka dibolomaasiyadda dhulalka ka mida dalkiisa oo loo tixgalinayo in ay ka mid yihiin cutub ka mida dalalka lagu dhaqayo mid ama wax ka badan qodobada isla Heshiiskaan, iyo, midkaan dambe oo kale, oo lagu dhaqayo qodobada cutubka dhulka la soo sheegay waana inloo in loo tixgaliyo arrintaas..
2. Midkasta o ka mida Dhinacyada Heshiiskaan wuxuu awoodaa, in uu markale wargaliyo ama qoraal ku wargeliyo, isagoo u sheegaya kan kale go'aankiis ah in u wax ka baddalayo heshiisyadii hore ay isku wargaliyeen iyadoo wargalin kasta ay dhaqangalayso lix bilood oo ka bilaabata marka Dhinac kasta ee Heshiiskaan ay soo gaarto wargelintaas.

**Qod. 39**

Laga soo bilaaba taariikhda dhaqangalka Heshiiskaan, waxaa loo qaadanayaa kuwa la tirtiray wixii ku saabsan dalalkaa uu Heshiiskaa……

Midowga Boqortooyada iyo Talyaaniga ee la xariira helitaanka hantida kuuliga dhintay ee ka mida labada Dawladood, ee lagu saxiixay London 17 Abril 1877, sidoo kale axkaamta ku saabsan Isweydaarsiga Qoraalka 31 Maarso 1951 oo dhexmaray Midowga Boqortooyada iyo Talyaaniga oo ku saabsan wax is-dhaafsiga lagu ballaarinayo saraakiisha qunsuliyadaha dalalkooda qaar ka mida dhimista kastamada.

**Qod. 40**

Heshiiskaa waxaa la ansixinayaa iyado qalabka ansixintana la isku waydaarsanayo London. Heshiiskaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta soddonaad kadib marka la is-weydaarsado ansixinta wuxuuna jirayaa illaa lix bilood ka dib taariikhda mid ka mida Dhinacyada Heshiska uu siiyo dhinaca kale ogaysiiska ashtakada.

Kalsoonida la siiyay awged Awood Haystayaasha Buuxa waxay saxiixeen Heshiiskaan waxayna saareen nigaxooda.

Wuxuu ka dhacay, Roma, iyadoo laga sameeyay laba nuqul oo asal ah, malinta 1 Juun 1954, kuna qoran luqadda talyaniga iyo ingriiska, labada qoraal iyadoo si isku mida uu kalsooni haysto.

Boqortooyada waxa u saxiixay

**Ashley Clarke**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaani waxaa u saxiixay

**Piccioni**

Waxaa hubiyay, amarka Madaxweynaha Jamhuriyadda
Wasiirka Arrimaha Dibadda
**Martino**

---

## BROTOKOOLKA SAXIIXA

Marka la saxiixo Heshiiska qunsuliyadda taariikha maantay Midowg Boqortooyada Britaanya iyo Waqooyiga Irland iyo Jamhuuriyadda Talyaaniga, kuwa hoos saxiixay oo haysta oggolashaha, waxay caddeynayaan sida soo socota:

Dhinacyada Sare ee Heshiiskaan waxay caddaynayaan haddii uu dagaal dhaco ama lakala goosto xiriirada dibolomaasiyeed, waxay tixgalinayaan in mabaadiida soo socota in xaafiisyada iyo saraakiisha qunsuliyadaha ay ku dhaqmayaan si waafqasan xeerarka guud ee caalamiga:

1. Xaaladda dagaalka ama jaridda xiriirada dibolomaasiyeed ee labada Dawladood, Dawlad kasta waxay xaq u leedahay in ay waydiisato xiridda qaar ka mida ama idil ahaan xaafiisyada qunsuliyadaha Dawladda kale, ee dhulkeeda ka furan. Iyagu waxay kalo xaq u leeyihiin in xiraan dhamman ama qaar ka mida xaafiisyadaha qunsuliyadaha Dawladda kale ee Dalalka kale ku yaalla oo ku hos jira maamulkooda ciidamada.
2. Marka la xiro qaar ka mida ama dhammaan xaafiisyadooda qunsuliyadeed ee dawlad ay ku lahayd Dal kale ama dal ku hoos jira maamulka ciidamada ee Dawladdaas dambe saraakiisha qunsuliyadaha (oo xitaa ay ku jiraan kuwa sharafeedka) iyo karaaniyaasha qunsuliyadda tan hore……………………………………… midda kale, haddii magacyadooda si saxa loo soo wargaliyay qaabkii ku habboonaa, iyadoo ah wehliyaan dhammaan xubnaha qoysaskooda waa in loo muddeeya oo la siiyaa waqti macquula oo wax lagu fududaynayo si ay dalka uga baxaan Dawladoodana u gaaraan. Iyaga waan in loo fidiyaa mucaamilo iyo ilaalin ku habboon illaa ay ka baxayaan, kaaso ku dhici kara muddo caqligala dhexdeed, iyaga waa in loo oggolaada in ay qaataan arkifiyadoda iyo dokumentiyada rasmiga sidoo kale waxayaabaha leh saaamayntooda shaqsiga iyo alaabada guriga/xaafiisyada ama, haddii ay doonayaan in loogu keydiyo dalka. Labada xaaladoodba arkiifiyada la soo sheegay iyo dokumentiga rasmiga waa kuwa aan lagu xadgudbi karin waana in la a dhammaan tallaaooyinka laga maarmanka u ah badbaadinta waxyabaha khaaska iyo alaabta.

   Kalsoonida la siiyay awged Awood buuxda Haystayaasha waxay saxiixeen Heshiiskaan waxayna saareen nigaxooda. Wuxuu ka dhacay, Roma, iyadoo laga sameeyay laba nuqul oo asal ah, maalinta 1 Juun 1954, kuna qoran luqadda talyaaniga iyo ingriiska, labada qoraal iyadoo lagu si isku mida uu kalsooni haysta.

Boqortooyada waxa u saxiixay
**Ashley Clarke**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaani waxaa u saxiixay

**Piccioni**

Lagu hubiyay, amarka Madaxweynaha Jamhuriyadda

Wasiirka Arrimaha Dibadda

**Martino**

---

## BROTOKOLKA LAABAAD EE SAXIIXA

Marka la saxiixo Heshiiska qunsuliyadda taariikha maantay Midowka Boqortooyada Britaanya iyo Waqooyiga Irland iyo Jamhuuriyadda Talyaaniga, ku hoos saxiixay oo haysta oggolashaha, waxay caddeynayaan sida soo socota:

Dhinacyada Sare ee Heshiiskaan waxay ku heshiiyeen in axkaamta ku xusan qod. 14 iyo baaragarafka 2 qod. 29 ee Heshiiska la dhaqangaliyo illaa inta mid kasta Dhinacyada Sare ee Heshiiska uu ka wargalinayo dhinaca kale dhaqankalkaas.

Kalsoonida la siiyay awged Awood Haystayaasha Buuxda waxay saxiixeen Heshiiskaan waxayna saareen nigaxooda.

Wuxuu ka dhacay, Roma, iyadoo laga sameeyay laba nuqul oo asal ah, malinta 1 Juun 1954, kuna qoran luqadda talyaniga iyo ingriiska, labada qoraal iyadoo lagu si isla mida kalsooni haysta.

Boqortooyada waxa u saxiixay
**Ashley Clarke**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaani waxaa u saxiixay
**Piccioni**
Lagu hubiyay, amarka Madaxweynaha Jamhuuriyadda
Wasiirka Arrimaha Dibadda
**Piccioni**

Safaaradda Ingriiska

ROMA 1 Juun, 1954

Haybadle.

Waxaa ii sharafa in aan ku soo gaarsiiyo farriintan soo socota, si la isla meelo dhigo loona xuso mowqifka Boqortooyada Dawladda Ingriiska ee la xariira dhaqangalinta iyo fasiraadda Qodobka 9 (1), 11 iyo 28 ee Heshiiska Qunsuliyadda ee taariikhda maalmahaas.

Arrinta ku saabsan qod. 9, waxaan ogaanay waxayaabaha uu sheegayo baaragrafka (1) in aan lagu dhaqi karin:

(a) Jasiradaha Jersey;

(b) Dal kasta ee Boqortooyada oo xeerkaan qabanayo oo lagu helayo milkiga wuxuu ku koobanyahay, dadka deegaanka loogu yimid ee dalka laga hadlayo, haddii ama illaa Boqortoyadu iyadoo tixgalinaysa Midowga Boqortoyada Britaanya iyo Waqooyiha Irland aanu sabab u noqon in Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga la wargaliyo in xeerka Jasiirada Jersey ama mid kasta oo dalkaasa, sida arrinta ay noqon karto lagu naqliyoo oggolaashaha saamaynta waxyaabaha la soo sheegay.

(a) Dhinacayada Sare ee Heshiiskaan gaaray, waxay si buuxda uu gaaryeelanayaan mowqifkooda ku saabasn arrintaas oo la siinayo tixgalin la isla oggolyahay ee lagu dhaqayo waxa u sheegayo baaragarafka (2) iyo (5) oo la siinayo saraakiisha iyo karaaniyeyaasha qunsuliyadda oo buuxiya shuruudaha lagu soo sheegay baaragraf hoosaadyada (a) iyo (b) ee baaragarafka (6) haseeyshe aan buuxinayn shuruudaa lagu soo sheegay bagaarafka hoosaadka (c);

(b) waa lagama maarmaan haddii loo baahdo sarkaal ama karaaniga qunsuliyaddaas in uu qabto adeegyada nooc kasta ee ciidamada, badda, circa, boliiska ama maamulka, wargalin ku habboon la siinayo si sarkaalka ama karaaniga ay khusayso loo baddalo; iyo

(c) Iyadoo la dhowrayo baaragarafka (4) ereyga " qiimaha rasmiga amse sarifka" in loo fasiro ama lagu tilmaamo qiimaha rasmiga ee Isterliinka oo ay gooyaan masuulinta Xakamaynta Sarifka (Exchenge Control), haddii ama illaa Dhinacyada Sare ee Heshiiskaan ku heshiiyaan marka la hirgalinayo isla saldhigga lagu go'aaminayo qiimaha sarifkaas.

Waxa ku saabsan qod. 28 waa mid laga baaraandegayo iyado ereygo uu yahay " figri siyaasadeed" oo loo arki doona in lagu daboolo dacwo ama qof kasta oo ku eedaysan damibi leh dabeecad siyaasadeed.

Waan idin bogaadin lahaa Mudane haddii aad nala qaadataan nuxurka , saddexaad iyo affaraad ee baaragarfyada kore haddi uu waafaqo mowqifka Xukuumadda talyaaniga.

Waxaan anigoo ka faaidaysanaya fursaddaan mar kale Mudane waxaan ku hayaa qaddarintayda ugu sarreysa.

**Ashley Clarke K.C.M.G**

Mudane
Signor **Attilio Piccioni**
Lagu, amarka Madaaxweynaha Jamhuuriyadda
Wasiirka Arrimha Dibadda